



OGEYIIS MUHIIM AH OO KU SAABSAN DHAMMAAN QAXOOTIGA IYO MAGANGALYO-DOONKA EE KU NOOL MAGAALOOYINKA IYADA OO LA EEGAYO CUDURKA CORONAVIRUS (COVID-19)

Waxaa soo saaray Xoghaynta Arimaha Qaxootiga (RAS), Dowlada Kenya

(la soo saaray: 10 July 2020)

Dowladda Kenya waxay soo rogtay xayiraado looga hortago sii faafitaanka kordhayo ee COVID 19. Xayiraadahaas waxaa ka mid ah bandow laga bilaabo 9-ka fiidnimo iyo 4-ta aroornimo, Mamnuucidda isu imaatinka inka badan 15 qof oo hal goob ah iyo sidoo kale inay ku xirtaan maaskarada wajiga meelaha dadweynaha.

Sababo la xiriira tilmaamaha Dowladda ee lagu yareynayo faafitaanka COVID 19, **ma jiraan shaqaale borotakshon ah oo jir ahaan joogo xafiiska** si ay u qaabilan qaxootiga. Ilaa amar dambe, qaxootiga doonaya inay soo gudbistaan arrimaha borotokshonka waxay ku sameyn karaan sida tan:

- **So wac UNHCR cawitanka leenleenka: 0800720063 (wicitanka wa bilaash) or**
- **Email: helpline.kenya@unhcr.org.**

Khadku wuxuu u gudbin doonaa codsiyada shaqaalaha borotokshanka ee UNHCR si loo helo dabagal

Qaxooti ahaan waxaa lagaa filayaa inaad lashaqeyso oo aad raacdho sharciyada iyo qawaaniinta Dowlada markasta. soo deggitaanta ama isu immitaatinka bannaanka xafiiska UNHCR waa mid ka soo horjeedda xayiraadaha Dowladda, oo naftaada, carruurtaada iyo kuwa kaleba waxaad u gelineysaa halis qaaditaanka iyo faafin COVID-19. **Haddii aad go'aansato inaad sii waddo deggitaanka ama soo buuxinta banaanka xafiiska UNHCR ama meel kale, Dowladdu waxay ku talisay inay qaadi doonto tallaabada lagama maarmaanka ah sharciga dhexdiisa.**

- Fadlan waxaa lagu waaninaya in dadka helay kaalmada lacageed ama sii wadaan helitaanka gargaarka lacageed **aan la siin doonin gargaar dheeri ah.**
- **Dib-u-dejinta ayaa hakisan** oo qof cusub looma aqoonsan doono dib-u-dejinta muddooyinkan.
- Haddii aad dooneyso inaad soo sheegto arimaha borotokshonka, fadlan wac Khadka Caawinta. **ma kula soo xiriiri doonaan shaqaalaha UNHCR inta aad joogto bannaanka xafiiska UNHCR.**
- **Caawinaada meelaha magaaloyinka waa mid said uxadidan.** Haddii aadan awoodin inaad adigu iskaa u maareeso magaalada Nairobi ama magaaloyinka kale ee aad ubaahantahay caawimaad, ma jiro wado kale oo aan ahayn inaad u guurto Kakuma halkaas oo adeegyada ay kamid yihii cunno, biyo, waxbarasho, caafimaad iyo hoy laga helikaro.
- **Haddaad rajeyneso inaad u guurto Kakuma,** fadlan wac Khadka Caawinta waxaana lagu siin doonaa macluumaad ku saabsan goorta u guurista xerada ay dhici doonto.

Waqtiyadan qofna uma fududo. Haddii aad la kulanto xaalad degdeg ah oo aad u baahan tahay caawimaad, fadlan eeg lambarada gargaarka degdega ah ee soo socda:

| | |
|---|---|
| Diiwaangelinta / warqadaha: Refugee Affairs Secretariat Shauri Moyo: 0772057770 | Rabshadaha laxariiro jinsiga Khadka wicitaanta waa: 1195/ 0800720501 |
| Caafimaadka degdega: NCCK 0704873342 / 0723281352/ 0723281362 | Arimaha la xariiro karaka caafimaadka (National Hospital Insurance Fund): 0740049502 |
| Xaaladaha degdega ee sharcieed (xiritaan, Dhibaatooyinka askarta): Kituo cha Sheria 0720806531 | Borokshanka caruurta Khadka wicitaan waa: 116 |
| kansalin Khadka wicitaanka waa: 1190/ 1199/ 0721 336017 | |

COVID 19 wuxuu si toos ah ugu fidaa dhibcaha (qufaca / hindhisada) qofka cudurka qaba; si aan toos ahayn iyada oo la taabto sagxadaha ama walxaha uu isticmaaley qof cudurka qaba. Haddii aad leedahay **mid ka mid ah calaamadaha COVID-19** sida qandho, qufac, neefta oo ku qabata iyo dhibaatooyinka neefsashada, fadlan kala xiriir Wasaaradda Caafimaadka 0800721316 (wicitaan bilaash); 0732353535; ama 0748592558 hagitaan.

